



## EUCAP SOMALIA

Hawlgalka Tayeynta Midowga Yurub ee Soomaaliya

---

WAR-SAXAAFADEED

Muqdisho, Luulyo 2022

### **EUCAP Somalia waxay u dabaaldagtay sanad guuradii 10-aad**

16-ka Luulyo 2022 waxay ku beegantahay sanadguuradii 10-aad ee ka soo wareegtay markii la aas aasay howgalka tayeynta midowga yurub ee la magac baxay EUCAP Nestor. Sanadkii 2012 oo la asaasi howgalka waxaa loo badalay magaca EUCAP Somalia sanadkii 2016 iyadoo xarunteedu tahay magaalada Muqdisho.

*"Waan ku faraxsanahay inaan gaarnay heerkan oo an ku gaarney shaqo adag iyo dadaal, laakiin sidoo kale waxaa mahad iska leh iskaashiga miro dhalka ah iyo sida ay uga go'an tahay hay'adaha Soomaaliyeed"* ayuu yiri Chris Reynolds, Madaxa howgalka EUCAP Somalia.

Tobankii sano ee la soo dhaafay, EUCAP Somalia waxay gacan ka geysatay xoojinta Waaxda Amniga Soomaaliya, taageeridda awoodaha badda, horumarinta Booliska iyo dib u habeynta sharciga. Iyada oo ay kaashanaysa hay'adaha ay wada shaqaynta leeyihiin, ayaa hawl-galku waxa uu tababaro, qalabayn siiyey saddexda dekedood ee ugu waaweyn Soomaaliya, iyo Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee Muqdisho.

EUCAP Somalia waxaa ka go'aa taageerida iyo hirgelinta Qorshaha Kala-guurka ee Soomaaliya si loo dhiso xiriir adag oo mustaqbalka ifaya u leh dalka.

###